

LAGA BILAABO 20.7 KA JAWAAB BIXINTA CODSIYADA MAGAN-GALYO CODSADAYAASHU WAXAY NOQONAYSAA MUDO 6 BILOOD AH

Sharcigan cusub ee mudada ugu dheer ee codsiga magan-galyo ee codsashada la sugi karaa waxay dhaqan galaysaa 20.7. Sida sharcigani uu qabo 20.7.2018 wixii ka dambeeya codsiyada la soo xereeyo ee magan-galyada waxaa jawaab laga soo bixin ama go'aan lagaga gaarayaan ugu badnaan mudo 6 bilood ah.

Sharcigan cusub ee la badalay wuxuu kaliya khusayn doonaa 20.7.2018 wixii ka dambeeya dadka codsiyada soo xereeysta

Sharcigan cusub ee ku saabsan mudada codsiga magan-galyadu kaa maqnaanayo wuxuu kaliya khuseeya 20.7.2018 ka dib codsiya la soo xereeyo bes. Mudada cosdigu kaa maqnaanayo waxaa laga soo xisaabinayaa oo ay ka bilaabmaysaa maalinta aad geeysto codsiga magan-galyada ama aad booliska iska dhiibto ama ciidamada xuduudaha ilaaliya isu dhiibto.

Ka hor 20.7.2018 codsiyadii la keensatay ama dadkii is dhiibay wakhtigaas ka hor sharcigan cusub ee mudada jawaabaha la sugayaa ay ugu badnaan tahay 6da bilood waxba kama khuseeyaan.

Mudada lagaga soo jawaabayoo codsiyadaas waxaa laguugu sheegay markii waraysiga weyn ee magan-galyada lagula yeelanayey.

Xaaladdaha qaarkood waxaa waliba dhici karta in wakhtiga aad jawaabta sugaysaa uu ka bato inta sharcigan cusubi uu qabo. Haddii mudada laguugu sheegay waraysiga interfiyuuga uu ka bato wakhtiga aad jawaabta sugaysa ama uu ka bato mudada 6da bilood ah ee sharcigu uu qabo, oo wakhtigaas in laguugu soo jawaabo ay nagu filaan weeydo, waxaan qofka codsadaha ah ugu sheegi doonaa mudada uu na sugayo si gaar ah.

Waxaad ka xisaabin kartaa ama ka eegan kartaa mudada aad jawaabta ku qaadanayso kaalkulaytarka ama xisaabiyyaha ku jira boggayaga Migri.fi

Dadka codsiyadu u maqan yihiin ee jawaabaha sugayaa waxay mudada ay jawaabta ku qaadanayaan ka eegan karaa bogga migri.fi kaalkuleeytarka ku jiray ee xisaabiya wakhtiga jawaabta la sugo.